



Macluumaadka Xiriirkaaga. Xaquuqahaaga. Mas'uuliyadeenna.

Ogaysiiskan wuxuu qeexayaa sida macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan loo isticmaalayo iyo sida aad ku heli karto macluumaadkaan.

Fadlan si taxaddar leh dib ugu eeg.

Xaquuqahaaga

Marka loo yimaado macluumaadkaaga caafimaadka, waxaad leedahay xaquuqo gaar ah.

Qaybtaanu waxay sharaxaysaa xaquuqahaaga iyo qaar kamid ah mas'uuliyadahaaga si ay kuu caawiyaan:

Hayso nuqul elektaroonik ah ama waraaq ah oo xogta caafimaadkaaga ah

- Waxaad codsan kartaa inaad aragto ama aad hesho nuqul elektaroonig ama waraaq h oo xogta caafimaadkaaga ah iyo macluumaadka kale ee caafimaadka ee aan kaa hayno. Na weydii qaabka arrintaan loo samaynayo.
- Waxaanu ku siin doonnaa nuqul macluumaadkaaga caafimaadka ah, sida caadiga ah 30 maalmood gudahood kaddib marka aad soo codsato. Waxaa dhici kartaa inaan qiime macquul ah kaaga qaadno, oo ah khidmad kharash ah.

Na weydii inaan kuu saxno xogtaada caafimaadka

- Waxaad na weydiisan kartaa inaan kuu saxno macluumaadka caafimaadka ee kugu saabsan ee aad is leedahay inaysan saxnayn ama aysan dhammaystirnayn. Na weydii qaabka arrintaan loo samaynayo.
- Waxaa dhici karta inaan "maya" niraahno codsigaaga, laakiin haddii aanu maya niraahno, waanu kuu sheegi doonnaa sababta ayada oo qoraal ah 60 maalmood gudahood.

Codso xiriir qarsoon

- Waxaad na weydiisan kartaa inaan kuula soo xiriirno qaab gaar ah (tusaale ahaan, telefoonka guriga ama xaafiiska) ama inaan boostada kuugu soo dirno ciwaano kala duwan.
- Waxaanu dhihi doonnaa "haa" dhammaanba codsiyada macquulka ah.

Na weydiiso inaan koobno waxa aan isticmaalno ama aan dadka la wadaagno

- Waxaad na weydiisan kartaa in aanaan isticmaalin ama aanaan cidna la wadaagin macluumaad caafimaad oo gaar ah qaybaheena daaweynta, lacag bixinta, a,a howl-wadeenadeena.
- Khasab naguma ahan in aan aqbalno codsigaaga, waxaana dhihi karnaa “maya” haddii ay daryeelkaaga saamaynyaso.
- Haddii aad jeebkaaga ka bixinayso lacagta adeegga ama daryeelka caafimaadka gabi ahaanba, waxaad na weydiisan kartaa in aanaan macluumaadkaas la wadaagin caymis bixiyahaaga sababaha lacag bixintena ama howlaheena dartood.
- Waxaanu dhihi doonaa “maya” ilaa in sharcigu khasab nooga dhigayo maahane in aan macluumaadkaas cid la wadaagno.

Hel liiska dadka aan macluumaadka la wadaagnay

- Waxaad codsan kartaa liiska (xisaabaadka) wakhtiyada annu la wadaagnay macluumaadkaaga caafimaadka muddo lix sanno ah kahor taariikhda aad codsatay, ee aan kula wadaagnay, iyo sababta.
- Waxaanu ku dari doonaa macluumaadka marka laga reebo kuwa ku saabsan daaweynta, lacag bixinta, iyo hawlaha daryeelka caafimaadka, iyo macluumaad kale oo gaar ah (sida mid kasta oo aad naga codsato inaan samayno). Waxaanu ku siin doonaa hal tiro sannadkii si bilaash ah laakiin waxaan kaa qaadi doonaa qiimo macquul ah, khidmad kharash ah haddii aad codsato mid kale 12 billood gudahood.

Hel nuqul kamid ah ogaysiisnaan dhowrsanaanta xogta ah

- Waxaad codsan kartaa nuqul waraaq ah oo ogaysiisnaan ah mar kasta, xaataa haddii aad aqbasho inaad ogaysiisnaan ku hesho qaab elektoroonig ah. Waxaanu si degdeg ah kuu siin doonaa nuqul waraaq ah.

Dooro qof kaa wakiil ah

- Haddii uu jiro qof aad siisay awood sharci caafimaad ah ama haddii qofku yahay wakiilkaaga sharciga ah, qofkaas wuxuu adeegsan karaa xaquuqihiisa wuxuuna gaari karaa xulashooyin ku saabsan macluumaadka caafimaadkaaga.
- Waxaanu xaqiijin doonaa in qofku haysto awooddaan uuna wakiil kaa noqon karo kahor inta aanaan qaadin wax tilaabo ah.

Soo gudbi cabasho haddii aad dareemayso in xaquuqahaaga lagu xadgudbay

- Waxaad soo gudbin kartaa cabasho haddii aad dareemayso inaan ku xadgudubnay xaquuqahaaga adiga nala soo xiriiraya oo isticmaalaya macluumaadka ku qoran bogga 1 aad.
- Waxaad usoo gudbin kartaa cabasho Xafiiska Xaquuqaha Madaniga ah ee Waaxda Caafimaadka iyo Adeegga Bulshada ee Maraykanka adiga oo: wacaya 1-877-696-6775, waraaq u diraya: 200 Independence Avenue, S.W., Washington, D.C. 20201, ama bookhanaya www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/complaints/.
- Kaama aargoosan doonaa sabab la xiriirta inaad cabasho naga gudbisay awgeed.

Sidee ayaan sida caadiga ah u adeegsanaa ama iskula wadaagnaa macluumaadkaaga caafimaadka? Waxaanu sida caadiga ah u adeegsanaa ama iskula wadaagnaa macluumaadkaaga caafimaadka si aan:

Kuu daaweyno	<ul style="list-style-type: none">Waxaanu adeegsan karnaa macluumaadkaaga caafimaadka lana wadaagi karnaa xirfadleyaasha kale ee ku daaweynaya.	<i>Tusaale ahaan:</i> Dhakhtar kaa daaweynaya xanuun ayaa dhakhtar kale weydiinaya caafimaadkaaga guud.
Howlaha ururkeenna	<ul style="list-style-type: none">Waxaanu adeegsan karnaa islama wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaadka si aan kuu siinno adeegyo, u hagaajinno daryeelkaaga, kulana soo xiriirno marka loo baahdo.	<i>Tusaale ahaan:</i> waxaanu macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan u adeegsanaynaa sidii ana u maarayn lahayn sidii shaqaalahaenu si wanaagsan kuugu daryeeli lahaayeen.
Biilka adeegyadaada	<ul style="list-style-type: none">Waxaanu macluumaadkaaga caafimaadka u adeegsan karnaa si aan ugu dalacno lacagtana uga helno caymisyada caafimaadka ama hay'adaha kale.	<i>Tusaale ahaan:</i> Waxaanu macluumaad ku saabsan caafimaadkaaga siinaynaa qorshahaaga caymiska si aan oga helno lacagta adeegyadaada.

Waa sidee qaabka kale ee aan u adeegsano ama isula wadaagno macluumaadkaaga caafimaadka? Waxa naloo ogolyahay ama khasab nagu ah inaan macluumaadkaaga siyaabo kale isula wadaagno – inta abadan qaabab ka qaybqaadanaya danaha bulshada, sida caafimaadka bulshada iyo cilmibaarista. Waa in aanu buuxinaa shuruud kasta kahor inta aanaan macluumaadkaaga cidna la wadaagin ujeedooyinka dartood. Haddii aad dooneyso macluumaad dheeraad ah ka eeg: www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/index.html.

Caawin ku saabsan caafimaadka bulshada iyo badqabka	<p>Waxaanu isla wadaagi karnaa macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan xaalado jira dartood sida:</p> <ul style="list-style-type: none">Kahortagidda cudurKa caawinta dib usoo celinta wax soosaarSoo sheegista falcelin daran ama xaalad caafimaadSoo sheegista shaki ku saabsan xadgudub, dayacaad, ama qalalaase qoysKahortaga ama yaraynta xaalad khatar ku ah caafimaadka ama badqabka qof walba
--	--

Sameynta cilmibaaris	Waxaanu macluumaadkaaga u adeegsan karnaa ama iskula wadaagi karnaa cilmibaaris caafimaad darteed.
-----------------------------	--

U hogaansamidda sharciga	Waxaan isla wadaagi doonnaa macluumaadka adiga kugu saabsan haddii shuruucda federaalka ama gobolku khasab nooga dhigto, oo ay kujirto Waaxda Caafimaadka iyo adeegyada Bulshada haddii ay doonayso inay aragto inaan u hogaansamayno sharciga dhowrsanaanta xogta ee federaalka.
---------------------------------	---

La shaqaynta imtixaan qaade caafimaad ama agaasimaha aaska	Waxaan macluumaadka caafimaadka la wadaagi karnaa diiwaangaliyaha dhimashooyinka, imtixaan qaadaha caafimaadka, ama agaasimaha aaska marka qofku dhinto.
---	--

Magdhowga shaqaalaha goobta, hay'adaha sharciga, iyo codsiyada kale ee dowladda

Waxaanu adeegsan karnaa ama isla wadaagi karnaa macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan:

- Waxyaabaha ku saabsan sheegashooyinka magdhowga shaqaalaha
- Ujeedooyinka dhaqangalinta sharciga ama sarkaalka dhaqan galinta sharciga
- Hay'adaha la socoshada sharciga ee howlaha sharcigu u ogolyahay
- Howlaha gaarka ah ee dowladda sida militariga, ammaanka qaranka, iyo adeegyada difaaca madaxtooyada
- Waxaan macluumaadka caafimaadkaaga ku saabsan iskula wadaagi karnaa anaga oo ka jawaabayna maxkamad ama amar dowli ah, ama anaga oo ka jawaabayna maxkamadayn.

Xulashooyinkaaga

Macluumaad caafimaad oo gaar ah dartiis, waad noo sheegi kartaa xulashooyinkaaga ku saabsan waxa ana kula wadaagayno. Haddii aad leedahay dookh cad oo gaar kuu ah oo ku saabsan qaabka aan macluumaadkaaga isula wadaagayno xaaladdaan hoos ku faahfaahsan, nala soo hadal. Noo sheeg waxa aad doonayso onaan samayno, waxaanna ku dadaali doonnaa inaan raacno tilmaamahaaga.

Xaaladahaan marka ay jiraan, waxaad haysataa labadaba xaquuqda iyo xulashada aad noogu sheegi karto in:

- Aan macluumaadkaaga la wadaagno qoyskaaga, saaxiibadaa, ama dadka kale ee ku luleh daryeelkaaga.
- Aan la wadaagno macluumaadka xaaladaha ka badbaadinta musiibooyinka.
- Aan kuula soo xiriirno dadaalada qaaraan aruurinta dartood.
- Aan la wadaagno macluumaad gaar ah oo ku saabsan daaweyntaada maandooriyaha iyo khamriga. macluumaadkaan wuxuu u baahan karaa oggolaanshahaaga oo qoraal ah kahor inta aanaan cidna la wadaagin.

Haddii aadan awood u lahayn inaad dookhaaga noo sheegto, tusaale ahaan haddii aad miyir daboolantay, horey ayaan u gali karnaa waxaana la wadaagi karnaa macluumaadkaaga haddii aan u raagno in adiga dan kuugu jirto. Waxaanu sidoo kale macluumaadkaaga isla wadaagi karnaa marka loo baahdo si loo yareeyo khataraha waaweyn ee aan laga baaqsan karin ee kusoo wajahan caafimaadka ama badqabka.

Xaaladahaan marka ay jiraan marna cidna lama wadaagayno macluumaadkaaga in aad oggolaansho qoraal ah na siiso maahane:

- Ujeedooyinka suuqgaynta ah.
- libinta macluumaadkaaga. Marna ma iibsanaayno macluumaadkaaga.
- Isla wadaagista ugu badan ee qoraalada daaweynta dhimirka. Ma haysanayno wax qoraalo aaweynta dhimirka ku saabsan ah.

Mas'uuliyadeenna.

- Sharcigu wuxuu naga rabaa inaan ilaalino dhowrsanaanta xogta iyo ammaanka ee macluumaadkaaga la ilaaliyay.
- Waxaanu si dhakhso ah kuugu oggolaan doonaa haddii xadgudub uu dhaco kaasoo waxyeelayn kara dhowrsanaanta xogta ama ammaanka macluumaadkaaga.
- Waa in aanu raacnaa waajibaadka iyo habraacyada dhowrista xogta ee ku qeexan ogaysiiskan aanna ku siinnaa nuqul kamid ah.
- Uma adeegsan doonno iskula wadaagi doonno macluumaadkaaga wax aan ka ahayn sida halkaan ku faahfaahsan inaad si qoraal ah noogu sheegto inaan samayn karno maahane. Haddii aad noo sheegto inaan sidaa samayn karno, waad iska badali kartaa aragtidaada wakhti kasta. Nagu soo ogaysii qaab qoraal ah haddii aad isbadasho.
- Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Ogaysiiska, kala xiriir Sarkaalka Dhowrista xogta ee HHS adiga oo adeegsanaya macluumaadka xiriirka ee Bogga 1 ee Ogaysiiskan ama eeg: www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/noticepp.html

Isbadalada ku yimaada Qodobada Ogaysiiskan: Waanu badali karnaa qodobada ogaysiiskan, isbadaladuna waxay ku dhacayaan dhammaanba macluumaadka aanu kaa hayno. Ogaysiiska cusub waxaad heli doontaa markasta oo aad ka codsato, xaafiiskeena, iyo websaytkeena.

- Taariikhda uu Ogaysiiskanu dhaqan galayo waa Sebtembar 1, 2014